



## Ka shaqeynta si loo xaqijiyo bilow habsami leh oo ku aadan sanad dugsiyeedka cusub.

Qoysaska iyo shaqaalaha PPS ee qaaliga ah,

Ii oggolaada in aan idin baro nafteyda – waxaan ahay kormeeraha guud ee ku meel gaarka ah ee cusub ee PPS laga soo bilaabo Luulyo 1, waxaanan rajaynaynaa in aan la shaqeeyo adiga iyo ardayda inaga oo u diyaar garoobayna sanad dugsiyeed cusub. Waxaan ku faraxsanahay jihada ay u socoto degmadu. Waxaanu leenahay macallimiin, maamulayaal iyo shaqaalaha wax taageera oo hibo leh, waxaanu haysanaa dhismayaal cusub oo soo socda iyo dareen soo cusboonaaday oo yididiilo geliyay mustaqbalkeena.

Waxaan doonayaa in aan u mahadceliyo xubnaheena guddiga ee sii socda Steve Buel, Pam Knowles iyo Tom Koehler dadaalkooda dhanka adeega ee ku aadan PPS. Waxaan sidoo kale doonayaa in aan soo dhaweeeyo xubnaheena guddiga ee soo socda Julia Brim-Edwards, Rita Moore iyo Scott Bailey, iyo wakiilkeena ardayga, Moses Tran, oo noqon doona arday sanadkiisii u dambeeya dhigta Benson. Ugu dambeyntii, waxaan doonayaa in aan u mahadceliyo Bob McKean oo xasilooni la soo dhaweeeyay u keenay degmada muddadii 10 billood ahayd ee uu ahaa kormeeraha guud ee ku meel gaarka ah. Waan fahamsanahay in uu helo waqtii uu qalmo oo uu kaga soo kaluumaysto Montana, waxaanan u rajaynayaa wanaag.

Waxaanu si adag u shaqayn doonaa inta lagu jiro xagaaga si aanu dugsiyada uga dhigno kuwo diyaar u ah wakhtiga loogu talagalay ee fasallada ee dayrtan isla markaana la xaqijiyo bilow habsami leh oo ku aadan sanad dugsiyeedka cusub. Marka loo soo dhawaado waqtigii dugsiga lagu soo noqon lahaa, waxaad aniga iyo degmada ka maqli doontaan waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan isbedelada adiga iyo ardaydaadu u baahan tiihiin in aad ogaataan iyo wararka kale ee PPS.

Ilaa taasi dhacayso, waxaan waqtigeyga ku bixinayaa xaqijinta in hawlaho degmadu u socdaan si wax ku ool ah isla markaana hufan intii suurta galba ah. Aniga oo sii wadi doona taageerada guddiga PPS si ay uga shaqeeyaan shaqaalaysiinta kormeere guud oo joogto ah.

Ku raaxayso xagaagaaga!

Yousef Awwad

Kormeeraha Guud ee Ku meel gaarka ah